# Tallaalka Caruurta: Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

Halkan waxaa ku qoran su'aalaha qaar inta badan la isweydiiyo oo ay dhici karto inay akhrintooda wax kuu tarto ka hor inta aadan tagin ballamada ilmahaaga lagu tallaalayo.

**Ma u badan tahay inuu ilmaheyga qandhado marka la tallaalo ka dib?**
Waxaa dhici karta inay caruurta qaar wax xoogaa qaadan xasillooni daro oo ayna in yar qandho qandho qabato, taas oo ay tahay inaysan heyn wax 2 beri ka badan.

- Ilmaha sii wax badan oo ay cabaan
- Ilmaha sii baarasitamool (paracetamol) dareere ah haddii loo baahdo

XUSUUSNOW: ha siin kaniinka asbiriinka (aspirin) ah ilmaha 16 jir ka yar haddii uusan takhtar u soo qorin

**Maxay tahay sababta ay caruurta ugu baahan yihiin qaadashada tallaalada qaarkood?**
Tallaalada waxa ay caruurta ka difaacaan cuduro badan oo halis ah, waxaana jadwalka loogu dejiyaa sida ugu fiican ee suurtogalka ah oo uu u difaaci karo waxaana la siiyaa goorta uu ugu waxtarka badan yahay.

**Maxay tahay sababta ay UK wadamada kale uga duwan ahay?**
Inta badan wadamada kale ee aduunka tallaalo isku mid ah bay siiyaan cunugyada, caruurta iyo dadka waaweyn. Farqiga weyn ee jira waa inay qaar cudurada faafa ka mid ah wadamado qaar uga badan yihiin kuwa kale, iyo kala duwanaanshaha kartida ay adeegyada caafimaadka tallaalo cusub ku keeni karaan.

**Haddii la safraayo, ma waxa ay caruurta u baahanayaan in tallaalo saa'id ah la siiyo?**
Iyada oo ku xiran wadanka la booqanayo iyo waxa uu ilmaha sameyn doono, waa ay dhici kartaa in tallaalo saa'id ah loo baahdo. Fadlan inta aadan safarka qorsheysan la tasho kalkaaliyaha ama takhtarka.

**Tallaalka MMR (**Qaamow-Qashiir, Jadeeco, Jadeecada Jarmalka**) damiinnimo (autism) ma sababi karaa?**
Cilmi-baarista MA muujin wax isku xiriirin ah oo ka dhexeeya tallaalka MMR-ka ah iyo autism-ka.

**Maxaa tallaalada ku jira oo ammaan ma yihiin?**
Tallaalada waxaa ku jira waxyaabo kala duwan ah oo hubinaya inay si waxtar leh u shaqeynayaan. Tallaalada qaar waxaa ku jira cadad aad u yar oo fiirosyo (viruses) ama bakteeriya (bacteria) la tabar yareeyey. Ma jirto halis ay dad caafimaad qaba tallaalka cudurka uga qaadi karaan.
Waxyaabaha tallaalka ku jira waa ammaan oo waxaa nidaam u dejiya Wakaaladda Nidaam U Dejinta Daawada iyo Daryeelka Caafimaadka (the Medicine and Healthcare Regulatory Agency 'MHRA').

**Tallaalada ma waxaa ku jira jelatiin (gelatine) doofaar laga soo jarey?**
Waxaa jira labo tallaal oo uu jelatiin ku jiro oo gudaha UK caruurta lagu siiyo: Nasal Flu (Tallaal San ku Buufiska ah) iyo MMR (MMRVaxPro). Tallaalka San Ku Buufiska ah waa ceeryaamo khafiif ah oo sanka lagu buufiyo (irbad la'aan) waana kan ugu fiican ee looga hortago hargabka ilmaha da'da 2 sano ama ka weyn jira. Haddii uu ilmahaaga buuxiyey shuruudaha tallaalka hargabka lagu qaato laakiin aad rabtid in tallaalka irbid ahaan loogu mudo halkii tallaalka sanka loogu buufiyo laga siin lahaa, GP-gaaga ayaad weydiisann kartaa. Waxaa la heli karaa labo tallaal oo MMR ah, mid jelatiin ku jiro (MMRVaxPro) iyo mid jalatiin ku jirin (Priorix). Waa aad codsan kartaa in ilmahaaga la siiyo tallaal aan jalatiin ku jirin,GP-ga uun weydiiso.

**Ilmaha ma u ammaan baa in uu tallaalo badan hal maalin qaato (tusalle 2 bil jir, saddex tallaal u baahan)**
Haa, caruurta waa u ammaan in dhowr tallaal hal mar la siiyo, tan waxaa kale oo ay yareyneysaa tirrada irbadaha ay u baahan yhiin.

**Ma okay baa in aan la tallaalin ilaa uu ilmaha ka weynaado?**
Tan lagu ma talliyo maadaama uu jadwalka tallaalka loo qaabeeyey si waafaqsan in ilmahaaga la tallaali doono marka uu gaaro goorta uu tallaalka kasta ugu waxtarka badan yahay.
Cunugyada iyo caruurta da'yarta ah aad bay ugu nuqul in uu cudur ku dhaco oo inta uu waqtiga aad sugeyso inaad ilmahaaga tallaashana, waxaa sii badanaya suurtogalka ah inuu cudur qaado oo uu jirado.

**Ma ammaan baa in la tallaalo haddii uu sankiisa diif ka socdo ama uu durey qabo?**
Haddii uu ilmahaaga qufacayo/durey qabo ma irto sabab aad ballanta tallaalista uga baaqato. Haddii uu ilmaha fayo-qabin uuna qandhan yahay, caadi ahaan tallaalista dib baa loo dhigi doonaa ilaa uu ka reysto. Sida kale, aad bay dhif u tahay inuu ilmaha in la tallaalo awoodi waayo. Fadlan la hadal shaqaalaha caafimaadka ee ku soo booqda, kaaliyahaaga ama GP-gaaga haddii aad ka welwelsan tahay inuu ilmahaaga awoodi karin inuu tallaalada oo dhan qaato goorta jadwalka tallaalista ku beegan iyo in kale.

**Ma ammaan baa in tallaalo kale la qaato in yar ka hor ama ka dib tallaalka BCG (kan Qaaxada)?**
Tallaalka BCG ka mid aha kuwa jadwalka caadiga ah ee tallaalada ku jira, waxaa la siiyo ilmo ama qof weyn oo loo maleynayo in uu TB (Qaaxo) qaadista halis ugu jiro.
Waa ammaan in tallaalo kale la qaato isla maalinta ama waqti yar ka dib markii tallaalka BCG la qaato.

**Waqtiga la qaadanayo tallaalka Rotavirus (Rotafiiros) ma muhiim baa?**
Waa muhiim in ilamaha cadadka u horeeya ee tallaalka Rotarix (Rotariks) ee shubanka ka difaaca la siiyo marka ay 2 bil jiraan, waa tallaalada hore ee cunuga la siiyo. Cadadka labaad waxaa la siiyaa ugu yaraan afar toddobaad ka dib markii kii hore la siiyey, waa tallaalada labaad ee cunuga la siiyo. Cadadyada Rotavirus (kan hore ama labaad) ilmaha lama siin karo ka dib marka uu gaaro da'da ah 23 toddobaad iyo 6 beri jirka ah, markaa waa muhiim inaad tagto ballantaada marka ay ku soo gaarto oo hubso inuu ilahaaga si dhameystiran u difaacan yahay.

**Haddii aan irbadaha ka cabsanayo, qof kale cunuga ma ii qaban karaa ama ma igu caawini karaa?**
Haa, haddii aad rabtid kalkaaliyaha caafimaadka ama xubin kale oo shaqaalaha ka mid ah ayaad weydiisan kartaa inay ilmaha kuu qabto.

**Haddii ay wato mataano wato, qof kale ma ila caawini karaa?**
Haa, kalkaaliyaha ama xubin kale oo shaqaalaha ka mid ah baad weydiin kartaa inuu ilmaha kula caawino.

**Haddii ay jiraan wax aad rabtid in si sii faahfaahsan looga hadlo, fadlan ha ka shakinin inaad hawl-yaqaankaaga caafimaad weydiiso inuu kaala hadlo wixii su'aalo saa'id ah ama welwel ah qabi kartid.**

**Waxa aad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalada ilmaha ka heli kartaa website-ka Guddiga Caafimaadka ee ah:** la tallaalayo qof kale https://cavuhb.nhs.wales/childhood-immunisations/

Ama teleefoonkaaga ku iskangaree muuqaalkan baaqa (code) ah:

**Dukumentigan oo af Welsh ku qoran waa la heli karaa / Mae'r ddogfen hon ar gael yn Gymraeg**